

Sameynta Goob Shaqoo Xushmad Leh

Waa maxay goobta shaqoo xushmada leh?

Building a Respectful workplace - Somali

Goobta shaqee xushmada leh waa meel laga taliyo wanaagga Shaqaalaha, wanaagga jidhkooda, maskaxdooda iyo bulshonimadooda. Goobta shaqo ee xushmadda leh:

- ! shaqaalaha waa lagu qiimeeya
- ! si adaab leh loola xiriiraa
- ! dadka ayaa loola dhaqmaa sida ay rabaan in loola dhaqmo

- ! si wanaagsan oo xushmad leh ayaa wax looga qabtaa isku dhacooda
- ! si fiican ayaa wax looga qabtaa anshax xumada iyo hanjabaada.

Maxaynu Uga Baahanahay Goob Shaqoo Xushmad Leh?

Dhamaanteen waxaynu u qalanaa goob shaqoo xushmad leh, markay dadka aan la shaqayno ina caayaan, noo hanjabaan ama wax ina yeelaan, waxay arimahaasi meel kadhac ku yihiin sharafteenna, wanaaggeena, shaqadeenana waxbay u dhimmaan. Waxaa kale oo ay hoos u dhigtaa wax soo saarkeena. Anshax xumo ku badata goob shaqo waxay hormood u noqon kartaa inay xaaladda guud ee goobta shaqo xumaato, dabadeedna shaqaale badani isaga tagaan.

Yaa u Xil Saaran Ka Hortaga Anshax Xumada?

Qof walba xilbaa ka saran inuu ka hortago anshax xumada.

Waxyaabaha Keena

Qof dabeecadiisa iyo sida uu u dhaqmo dulmiyaan dadka. Hadaad u aragtid in dabeecadaadu dulminayso qof kale jooji dabeecaddaas.

Bar Tilmaameed

Hadii qof dabeecadiisu wax kuu dhimayso u sheeg inuu kaa joojiyo dabeecadaasi adiga oo si ixtiraam leh uga jawaabaya, hana soo jeedinnin edeyn badan markiiba. Haddii dabeecadaas aadan rabin lagaa joojin waayo ama ka sii darto war gali qofka u qaabilsan arimahaas ee goobtashaqo.

Makhraati

Qofka arka anshax xumo dhacaysa, maaha inuu dhaho ima khusayso, waxaa waajib ku ah inuu faragaliyo dhacdadaas, talo wax ku ool ahna ka bixiyo si masuulnimo leh.

Qofka Awoodda Leh

Horjoogayaasha iyo maamulka goobtaas shaqo waa inay si deg-deg ah oo wax ku ool ah wax uga qabtaan anshax xumadaas. Sidoo kale, qofka loo shaqeeyo waxaa xil ka saran in uu goobta shaqo ka dhigo meel ka madax banan anshax xumo iyo hanjabaad.

Waxaa laga soo minguuriyey "adeegyada dhexdhexaadinta", ee loo yaqaanno "mediation services"

Muxuu Ka Qaban Karaa Qof ka Loo Shaqeeyo?

Qofka loo shaqayo waxaa waajib ku ah inuu goobta shaqo ka dhigo goob wanaagsan. Waxaa jira dhowr jid oo qofka loo shaqeeyo uu goobta shaqo uga dhigi karo mid xushmad leh waxaana ka mid ah:

Tababar

- ✓ Ku tababar dhamaan shaqaalaha iyo maamulka arimaha la xiriira ixtiraanka goobta shaqo.
- ✓ Hanuunin la siiyo dhamaan shaqaalaha cusub, loona sheego xuquuqdooda, xilkooda iyo waajibaadka ay shaqaalaha kale kuleeyihiin iyagana lagu leeyahay.
- ✓ Tababar kala gaddisan oo la siiyo.
- ✓ In lagu tababaro sida loo xalliyo khilaafaadka, isla markaana la hubiyo in horjoogayaasha iyo Maamulkuba ay xirfad dheeraad ah u yeeshaan sidii ay khilaafaadka u xalin lahaayeen

Xeer Hoosaad iyo Dhaqan Wanaagsan

- ✓ Hubi in xeer hoosaadka iyo dhaqamada Wanaagsan ay yihiin kuwo dhiiri galiyo xushamadda goobta shaqo.
- ✓ Kala qayb qaado shaqaalaha kale sidii loo sameynlahaa goobshaqo oo xushmad leh.
- ✓ Taageer oo dhiiri gali dadka dhaqanka wanaagsan

Dhis Masuuliyad

- ✓ Shaqaalaha iyo maamulkuba u sheeg in ay iyagu masuul ka yihiin gafafkooga.
- ✓ Baadhitaan ku samee dhamaan cabashooyinka anshax xumada iyo hanjabaada.
- ✓ Si fiican ugu fiirso dabeecadaha ixtiraamka leh xilliga la qiimeynayo waxqabadka iyo anshaxa shaqaalaha.

Maxaad Ka Qaban Kartaa?

Waxaad dhisi kartaa dabeecad kudayasho leh, haddii aad la timaaddo dhaqammadan:

- ! Isku day in aad fahantid fikradda qofka kale.
- ! Aqbal, qiimeena fikradaha kale ee fikirkaaga ka duwan.
- ! Adigu isfahmsii dareenkaaga inta aadan la wadaagin dadka kale.
- ! Ha eedeeyn, ha u hanjabin hana magacdhawin qof xitaa hadaad xanaaqdid ama lagu waxyeelo
- ! Ka warbixi faquuqa, hanjabaadda ama aflagaadaynta.

Waa Maxay Handadaad?

Handadaaddu waa wax-dhimmaal iyo si xun oo loola dhaqmo ama loo faalleeyo shaqsi, sababta oo ah meesha uu ka soo jeedo ama loo maleeyo in uu ka soo jeedo. Waxay kalooy noqon kartaa shukaansi uunan qofka kale raali ka ahayn. Sharciga Xuquuqul Insaanka Manitoba waa ka mamnuuc in qof la handado.

Wixii faahfaahin ah kala xiriir

MFL Occupational Health Centre

102-275 Broadway
Winnipeg, Manitoba R3C 4M6
Phone: 204-949-0811
Toll Free: 1-888-843-1229(Manitoba only)
Email: mflhcc.mb.ca
Website: www.mflhcc.mb.ca

Mediation Services

302-1200 Portage Avenue
Winnipeg, Manitoba
Phone: 204-925-3410

Manitoba Human Rights Commission

7th Floor - 175 Hargrave Street
Winnipeg, Manitoba
Phone: 204-954-3007
Toll Free: 1-888-884-8681
Website: www.gov.mb.ca/hrc

July 2009